

Cudurka Bakteeriyada Shillinta Deerada (Anaplasmosis)



Xaashida xaqiiqada



Cudurka bakteeriyada shillinta deerada waa jirro ay keento bakteeriyada *Anaplasma phagocytofilum*. Waxaa lagu kala qaadaa qaniinyada shillinta *Ixodes scapularis* ee qabta cudurka (sidoo kale loo yaqaano shillinta deerada).



Qof kasta ayaa qaadi kara cudurka bakteeriyada shillinta deerada, balse dadka wakhtiga ku qaata guriga bannaankiisa ayaa halis sarreysa ugu jira.

Calaamadaha iyo Astaamaha Guud



Qandho iyo Qarqaryo



Madax-xanuun




Murqo-xanuun




Lalabbo iyo Calool-xanuun

Calaamadaha iyo Astaamaha Aadka U Daran



Neefsasho la'aan



Hawlgabka Kelyaha




Dhibaatooyinka Dareenka

Astaamuhu waxay u dhaxeyn kartaa kuwo fudud ilaa kuwo daran. Dad aad u yar ayay ku dhacaan astaamahan oo **dhan**.



La hadal dhakhtarkaaga haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadahan ama astaamahan kadib marka ay shillin ku qaniinto. Cudurka bakteeriyada shillinta deerada waxaa lagu ogaadaa oo lagu saleeyaa calaamadaha iyo astaamaha waxaana lagu xaqiijiyaa baaritaano dhiig. Waxaa lagu daaweeyaa antibiyootik/daawooyinka jeermiska dila.

Kahortagga Qaniinyada Shillinta



Xiro dhar midab khafiif ah leh, gacmo-dheer leh iyo surwaalo lugo dheer. Iskaalshahaaga/sigsaant aada ka soo kor mari surwaaladaada.



Isticmaal sunta cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen.



Xaaq caleemaha soo daata oo jar cawska daaradaada.



Si maalinle ah u samee hubinta shillinta oo sidoo kale hubi rabaayadahaaga.

Si Ammaan leh u saarista Shillinta



Isticmaal qaaddada shillinta ama birqabadka shillinta si aad shillinta uga saarto gurigaaga.

-Adigoo isticmaalaya birqabad, kaga qabo shillinta afka oo isticmaal caddaadis joogto ah si aad shillinta uga saarto gurigaaga. Ha isticmaalin dhaqdhaqaaqyada xagaldaacinta leh.

-Adigoo isticmaalaya qaaddada shillinta, isku aadi afka qaaddada iyo madaxa shillinta oo si tartiib ah ugu soo qaad.

Ha isticmaalin ciddiyaha, taraq, ama fasliin si aad shillinta uga saarto gurigaaga. Hababkani waxay kordhiyaan halista caabuqa maqaarka ee jirka ku faafa.

Halkee Laga Helaa Shillinta Deerada ee Maine?

Shillinta deerada, ee qaadi karta bakteeriyada keenta cudurka bakteeriyada shillinta deerada, ayaa laga helaa meel kasta oo ka mid ah gobolka Maine. Aaggaga ay ku nool yihiin shillinta deerada waxaa ka mid ah:

- Aaggaga kaynta ama duurka ah
- Duur-joogta, goobaha dhirta aan laga jarin ee cawska dheer leh
- Burushka ama caleemaha uruuro

Shillintu waa mid ku firfircoon heerkul kasta oo ka sarreeya barafka.



Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/anaplasmosis
2. www.maine.gov/dhhs/tickfaq (Si aad uga hesho su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee shillinta)
3. www.cdc.gov/anaplasmosis
4. www.ticks.umaine.edu (Si aad u soo gudbiso shillinta si loo aqoonsado nooca ay tahay)
5. www.epa.gov/insect-repelents/find-repelent-right-you (Si aad u ogaato sunta celisa cayayaanka ee ay EPA ansixiyeen)

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.